**Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliya**
**Golaha Shacab**
**Guddiga Kheyraadka Dabiiciga iyo Bii'ada**

**جمهورية الصومال الفيدرالية**
**مجلس الشعب**
**لجنة الموارد الطبيعية والبيئة**

**Federal Republic of Somalia**
**House of the People**
**Natural Resources & Environnment Committe**

Tr: 02/02/2021
Muqdisho

Ku: Ra'iisul Wasaaraha JFS
Mudane Eng. Maxamed Xuseen Rooble
Muqdisho-Soomaaliya
Ku: Wasiirka Betroolka iyo Macdanta
Mudane Eng. Cabdirashiid Maxamed Axmed
Muqdisho-Soomaaliya
Ku: Wasiirka Maaliyadda
Mudane C/raxmaan Ducaale Beyle
Muqdisho-Soomaliya
Ku: Guddiga Maaliyadda Golaha Shacabka
Muqdisho-Soomaaliya
Ku: Hantidhawka Guud ee Qaranka
Mudane Maxamed Cali AFgooye
Muqdsho-Soomaaliya
Og: Madaxweynaha JFS
Mudane Maxamed Cabdulaahi Maxamed (Farmaajo)
Muqdisho-Soomaaliya
Og: Gudoomiyah Golaha Shacabka
Xildibaan Maxamed Mursal Sh. C/raxmaan
Muqdisho-Soomaaliya
Og: Golaha Sare ee kheyraadka Dalka

**UJ: GO'AANKA GUDDIGA KHEYRAADKA DABIICIGAA IYO Bii'ADA EE KU SAABSAN KHILAAFKA KA DHEX JIRA WASAARADDA BATROOLKA & MACDANTA IYO HAY'ADDA BATROOLKA SOOMAALIYEED (HBS)**

Guddiga kheyraadka Dabiicigaa & Bii'ada ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya oo ku gudo jiray kulamadiisii caadiga ahaa ayaa waxaa soo gaartay khilaaf xoogan oo mudo ka dhexjiray Hay'adda Betroolka Soomaaliya (HBS) iyo Wasiirka wasaaradda oo ku saabsanaa kala madaxbanaanshaha Hay'adda iyo Wasaaradda taasoo gabagabadii sababtay in xilkii laga qaaday gudoomiyihii Hay'adda, xubinimadii guddigana laga saaray si aan sharciga waafaqsaneen.

Wuxuu guddiga Baarlamaanka kulamo dhoor ah ka yeeshay falanqeynta dhacdooyiinkaa iyo sida xal sharciga waafaqsan loogu xalin karo.

Guddiga wuxuu hadiiba gudo galay xog uruursi iyo xog wareysi uu la yeeshay xubno ka tirsan Hay'adda Betroolka Soomaaliya (HBS) iyo Wasiirka Betroolka Mudane Cabdirashiid, kulamadaas oo guudiga uga soo if baxday arimo badan.

Guddiga Kheyraadka Dabiicigaa iyo Bii'ada:

**Markuu arkay:** Qod. 90aad xarafka (k) Dastuurka Fedraalka Soomaaliya, iyo

Xeer Madaxweyne Lr. 328 ee 22/11/2020 oo lagu Magacaabay Guddoomiyaha, Guddoomiye ku-xigeenka iyo Xubnaha Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed.

**Markuu Arkay:** Qod. 18aad, 19aad, 19(3), (x) ee Sharciga Betroolka oo qeexaya xilalka ee kala leeyihiin wasaaradda iyo Hay'adda Betroolka Soomaaliyeed (HBS) iyo sababaha xilwaayidda xubnaha HBS.

**Markuu Arkay:** Qod. 116 (A iyo B) ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya oo si cad u qeexaya" Shaqaalaha rayidka ah lagulama kici karo Bahdilid waajibaadkooda shaqo ay gudanayaan awgood; sidoo kale laguma sameyn karo xil ka qaadid, lagamana wareejin karo xaafiiska, darajadooda hoos looma dhigi karo, inay jirto sabab maangal ah oo sharciga ku dhisan mooyee.

**Markuu arkay:** Qod. 2aad (1.2.1), (1.2.4) ee Heshiiska Lahaanshaha, Maamulka iyo Wadaaga Dakhliga Kheyraadka Dabiiciga ah ee Dalka ee qeexaya in Hay'addu tahay Hay'ad loo igmaday shaqooyin u gaar ah oo ka madaxbanaan hawlaha Wasaaradda, iyadoo lagu qeexay heshiiska in Golaha Kheyraadka Dalka oo ah golaha ugu sareeya ee lagu lafoguro arimaha kheyraadka loolana noqdo wixii lagu xalin waayo golayaasha maamul. Golaha Keyraadka wuxuu ka koobanyahay **Madaxda Fulinta heer Federal iyo heer Dawlad Goboleed**.

**Markuu arkay:** Ka dib markii ay guddiga u cadaatay in xilalka wasaaradda iyo xilalka Hay'adda Betroolka oo la rabay in si kala madaxbanaan oo isu dheelitiran ee isku kaabaan ay gacanta wasaaradda ku wada aruurtay iyadoo marxaladda wadaxaajoodka u xilsaarantahay Hay'adda Betroolka Soomaaliyeed (HBS)-sida ku cad qod. 19 (14), Qod. 20aad, Qod 24aad (1), (2) ee Sharciga Betroolka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

**Markuu dhageystay**: Guddiga markuu fiiro u yeeshay jawaabaha su'aalihii wasiirka la weediiyay waxaa u sugnaaday (Fiiri Lifaaqa 1aad)

A) In uusan habraac sharciga waafaqsan u marin xil ka qaadistii iyo xubin ka saaridii gudoomihii HBS.

B) Wasiirku Isagoo og in xilka wada xaajoodka sharikadaha lala galayo ay u xilsaarantahay HBS ayuu haddana qirtay inuu isagu toos u galay.

**Markuu ogaaday**: In Miisaaniyaddii 2020 ee ku celiska aheed oo loo qoondeeyay gunada shaqo ee xubnaha Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed ay wasaaruddu toos u maamushay, isla markaana lawada qiray in lacagtii ka maqantahay 28% qoondadii loo qorsheeyay Hay'adda Baroolka Soomaaliyeed (HBS) loona baahanyahay in la cadeeyo Meesha ay ku maqantahay.

**Markuu Ogaaday:** In Miisaaniyaddii 2021 ee Golaha Shacabka u ansixiyay si guud Hay'adaha Dowladda Federaalka oo Hay'adda Batroolka Soomaaloyeedna si gaar ah loogu ansixiyay miisaaniyad ay u madax banaantahay kadib wuxuu wasaaradda Maaliyadda miisaaniyadii ay u madaxbaaaneed HBS hoos geeyay Wasaaradda Betroolka si aan waafaqsaneyn xeerka Miisaaniyadda iyo shuruucda dalka.-(Fiiri Lifaaqa 2aad)

Hadaba, Guddiga asagoo gudanaya waajibaadkiisa dastuuriga ah ee ku xusan Qodobada 68aad Faqradiisa 2aad, Qod.69aad faqradiisa 2aad xarfaha b&c ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya iyo Qod.2aad faqradiisa 8aad, Qod.34aad faqradiisa 9aad iyo Qod.50aad faqradiisa 12aad xarfaha b&c ee Xeer-hoosaadka Golaha Shacabka, Qodobadaas oo dhamaan faraya Xildhibaanada awoodna u siinaaya in ay qiimeeyaan, kormeeraan, la-xisaabtamaan, u kuur-galaan habka loo qabto shaqada, sida loo hirgaliyo sharciyada iyo qorshayaasha xukuumadda, hay'adaha ama koox kasta oo ay sharci ahaan shaqo kala dhaxeyso guddiyada Baarlamaanka, Guddiga wuxuu soo saray qodobadan hoos ku xusan:

1. Arimaha la Xiriira xil ka qaadista:
    a. Guddiga markuu si qotodheer uga baaraandagay qodobada 116 (A iyo B) ee Dastuurka JFS, Xeer Madaxweyne Lr. 328 ee 22/11/2020 (Fiiri Lifaaqa 3aad) iyo Qod.19(3),(x) ee Sharciga Betroolka, Dhageysanay jawaabihii iyo warbixintii wasiirka ee la xiriiray xil ka qaadista Gudoomiyaha Hay'adda, guddiga waxaa u cadaatay in xil iyo xubin ka qaadistii loo geystay Guddoomiyaha Hay'adda aysan ku fadhinin wax sabab ah oo maangal ah oo sharciga waafaqsan.
    b. Sidaas daraadeed, Ra'iisul wasaaraha Xukuumadda Federaalka waxaa xaq sharci ah loogu leeyahay in arintaan uu dib u eegis ku sameeyo gudoomiyahana loo fasaxo in uu shaqadiisa sii wato si loo ilaaliyo kalsoonida Golaha sare ee Kheyraadka Dalka (Dawlad Goboleedyada) iyo Kalsoonida Maalgashadayaasha Caalamiga ah (Shirkadaha).
2. Guddiga waxaa u muuqday in Wasaaraddu ku takrifal awoodeed ku qaadatay xilkii Hay'adda Betroolka Soomaaliyeed sida ku cad qod. 19 (14), Qod. 20aad, Qod 24aad (1), (2) ee Sharciga Batroolka JFS sidaa daraadeed waxaa la xasuusinayaa Ra'iisul wasaaraha JFS in uu si adag u korjoogteeyo uuna xaqiijiyo madaxbanaanida Hay'adda iyo in ay ka dhex abuuranto HBS iyo Wasaaradda xiriir iskaashi iyo wadashaqeyn damaanaq qaadaya Danta Guud iyo ka faa'iideysiga Kheyraadka Dalka.
3. Arimaha Miisaaniyadda:
    a) Waxaa la farayaa Hantidhawraha Guud ee Qaranka in uu soo xaqiijiyo lacagtii 28% aheed ee la hubiyay in ay ka maqantahay gunada xubnaha Hay'adda Betroolka ee lagu ansixiyay miisaaniyadii ku celiska aheed ee 2020.

b) Miisaaniyaddii 2021 ee Golaha Shacabka u ansixiyay Hay'adda Batroolka Soomaaloyeed madax maaliyadeed u madax banaantahay (Fiiri Lifaaqa 2aad) ayaa Wasiirka Betroolka si aan waafaqsaneyn xeerka Miisaaniyadda iyo shuruucda dalka kula soo wareegay miisaaniyadii sidaas daraadeed Waxaa la farayaa wasiirka wasaaradda Maaliyadda in qoondada Miisaaniyadii 2021 ee loo ansixiyay HBS uu dib uga soo celiyo kuna dhaqangaliyo siduu Golaha Shacabka ku ansixiyay.

4. Guddigu wuxuu yaqiinsaday inay wasaaradda ka tageen ama shaqada laga eryay (Arag lifaaqa 4aad) mas'uuliyiin iyo khubaro ku xeel dheeraa arrimaha batroolka iyo maalmulkooda, wasaaradiina aqoon guur ku dhacay {Institutional Memory Lost} sidaas daraadeed waxaa Ra'iisul wasaraha lagula talinayaa in uu u kuurgalo habsami u socodka xiriirka shaqo ee u dhaxeeya quburada aan wasaaradda looga maarmin iyo Wasiirka Wasaaradda Batroolka.

**5.** Guddigu wuxuu yaqiinsaday saacada yar ka dib, markii lagu dhawaaqay xil ka qaadista Guddoomiyaha HBS in wasaaraaddu xirtay Mareegtii (Website) Hay'adda iyo Cinwaanadii (E-mail accounts) ee Guddiga Maamulka Hay'adda xilli ay socoto wadaxaajoodka iyo ku qancinta maalgashadayaasha in ay Dalka maalgashadaan. Sidaa daraadeed guddiga wuxuu farayaa Wasiirka Batroolka iyo Macdanta in uu si degdeg ah u furo Mareegtii (Website) Hay'adda, ciddii falkaas ka dambeysayna lagula xisaabtamo (Arag lifaaqa 5aad)**.**

**6. Maadaama uu dhamaaday mudo xileedkii Xukuumadda, xili doorashana lagu jiro, xeer nidaamiyayaashii sharciga Batroolka JFS farayay in la sameeyo aan weli la diyaarin (sida Fiscal regime, Environmental law, License Bill and others) sida ku cad Qod. 45 ee Sharciga Batroolka, sidaas daraadeed guddiga kheyraadka wxuu Ra'iisul wasaaraha JFS kula talinayaa in uusan ogolaanin in heshiis shidaal la galo si feejigana uga ilaaliyo in ay wasaaradda gasho heshiisyo calami ah oo aan waafaqsaneen danta guud , Qatarna galin kara ka faa'iideysiga kheyraadka Dalka**

==Allaa Mahadleh==

Villa Hargeisa, Mogadishu
E-mail: nresources.committee@parliament.gov.so
Website: www.parliament.gov.so

Lifaaqa 1aad:

**Barlamaanka Federaalka SOomaaliya**

**Golaha Shacabka**

**Hadal-Qoraalka Kulanka Guddiga Batroolka, Kheyraadka Dabiigaa, Macdanta iyo Biyaha**

**Maalinta:** 23 Jannayo- 01/ 2021

**Goobta:** Hotel Sanaag

**Goorta:** 09:00 – 13:00 *(maalin kasta)*

**Ka soo qeybgalayaasha Shirka**: waxaa goobjoog ahaa:

1. Mudane Eng. Cabdirashiid Maxamed Axmed Wasiirka Batroolka
2. Xildhibaan C/fitaax Max'ed Cali-Gudoomiye xigeen
3. Xildhibaan Jawaahir Cabdi Cadaawe-Xoghaye
4. Xildhibaan Max'ed Axmed Abtidoon
5. Xildhibaan Daa'uud Max'ed Cumar (Bisinle)
6. Xildhibaan Muuse Axmed Ismaaciil
7. Xildhibaan Nuur Iidow Beyle
8. Xildhibaan Zakariye Xasan Sh. Cali
9. Xildhibaan Max'ed C/laahi Faarax (Gelle)
10. Xildhibaan Aamina Xasan Cali

Furitaanka Shirka: shirka waxaa furay Gudoomiyaha Shirka wuxuuna kusoo dhaweeyay Wasiir Batroolka Mudane Cabditashiid kana codsaday in hadlejeedintiisa Guddiga usoo bandhigo:

Wasiirka wuxuu warbixin dulmar ah ku sameeyay sooyaalkii shaqo ee mudadii uu ka shaqeenay Wasaaradda, wuxuu taabtay wasiirka in uu wasaaradda ugu yimid kaliya qabyo qoraalkii sharciga Betroolka oo ay wadeen quburo uu ka mid yahay Wiliam Kothar kadibna uu isagu bilaabay ka shaqeynta (1) Dhameysirka sharciga Betrolka, (2) Heshiiskii wadaaga Kheyraadka dabiiciga iyo (3) Dhismihii Hay'adda Betroolka Soomaaliya (SPA) oo la iga rabay in aan ku dhiso 6 bil gudahood ansixinta sharciga kadib. Wasiirka wuxuu si gaar ah u sii xusay in magacaabista xubnaha guddiga SPA oo ka kooban 9 xubnood oo lagu qeybinayay 4.5 habka awood qeybsiga Soomaalida, wuxuu intaas ku daray in Madaxda Dawlad goboleedyada ay soo kala direen Galmudug 1 Qof Hawiye, Hirshabelle 1 qof Hawiye, Benaadir 1 qof Beesha 5aad, Koonfur-Galbeed 1 Qof D&M, Somaliland 1 qof Dir/Isaaq, Jubbaland 1 Qof Daarood, Puntland weli ma soo magacaabin laakiin waa la fili karaa cida ay soo direyso.  Wasiirka waxuu intaa sii raaciyay in awood qeybsiga beelaha ka maqnaayeen 2

qof oo mid Dir koofureed yahay, qofka kalena D&M yahay, marka iyadoo taas jirto baan waxaan ku dadaalay in Dr. Ibraahim oo ka soo galo Hirshabeele ama Galmudug DG Hawiye waana ii suurtaabi waysay, Dr. Ibraahim wuxuu Muhiim u ahaa arimaha ka gun gaarida ka faa'iideysiga Shidaalka Soomaaliya oo uu horay isaga gacanta ugu hayay ilaa 2004 tii, marka mar hadii Dawlad Goboleedyadii Hawiye ay soo gudbin waayeen anigana aan ka maarmi waayay waxaan go'aansaday in aan kursigii Dir Koofureed yeelan laheed aan siiyo go'aankaasna waxaa igu garab istaagay Xildhibaan C/laahi Carab iyo Xildhibaan Zakariye sidaas baana xubintii ku siiyay Dr. Ibraahim hadana waan ka qaaday kursigii sababo wadashaqeyn la'aan waxaana dib ugu saxay Awood qeybsigii waxaana xubintii u celiyay Dir koofureed.

Gudogalkii Su'aalaha iyo Jawaabaha:

S1: Xildhibaan

Wasiir waxaad warbixintaadii ku sharaxday jawaabaha qeyb ka mid ah su'aalihii aan ku weediin rabnay. Waxaad sheegtay wasaaradda in aad ugu timid draft ga sharcigii Betrolka oo socda kaliya marka wasiir daraft ga sharcigaas kaliya uguma aadan imaanin wasaaradda ee waxaad kaloo ugu timid dad quro ah oo shaqooyinka Shidaalka gacanta ku hayay oo wasiiradii kaa horeeyay ee ku abuureen wasaaradda. Dhinaca kale Wasiir ulajeedada kulankeena hadaan warbixin kooban kaa siiyo shirkeenu wuxuu ku saabsanyahay in aan wax ka ogaano waxyaabaha aad ku saleysay xil ka qaadida Dr. Ibraahim iyo qodobo kale oo la xiriirta Korjoogteenteena hawlaha shaqo ee wasaaradda. Ugu horeyn wasiir arinta la xiriirta 4.5 ee aad xilka uga qaaday Dr. Ibraahim horta markii hore adigaa ka talaabsatay in aad xubnaha guddiga ku soo dhisto 4.5 oo qalad beey aheed, hadana in aad xilkii uga qaado Dr. Ibraahim arimo la xiriira sixida 4.5 waa khalad kale, Dr. Ibraahim kulankii aan la yeelanay wuxuu inoogu sheegay in uu hal mar ka warhelay in xilkii laga qaaday iyadoo diginin af ah iyo mid qoraal toona la siinin. Su'aasheeda xil ka qaadida Dr. Ibraahim saddax dhinac beey ka imaaneysaa (a) Dhinaca Bini-aadannimada, (b)Dhinaca sharciyada (c) iyo Dhinaca saamenta ay ku yeelan karto shirkada daneenaya shidaalkeena.

1. Wasiir Dr. Ibraahim wuxuu horay inoogu sheegay in uu wasaaradda ku soo biiray sanadku markuu ahaa 2004tii xiligaa wasiir Daa'uud uu wasiirka wasaaradda ahaa uuna isaga ku soo qanciyay in uu Dalkiisa u shaqeeyo kana soo tago shaqooyinkiisii kale ee uu heystay uuna ka aqbakay wasiirka in uu wasaaradda ka qaato mushaar ka yar 50% daqligiisii hore oo xitaa mushaarkii yaraa bilo kooban ka dib uu ka istaagay lacag la'aana ku soo shaqeenayay marka qofka sidaa naftiihurnimada leh Dalkiisa ugu shaqeeyay in aad ka xishooto eryidiisa sooma fiicneen kaba sii darane sida aad u erisay soo ma waxyeeleeneyso mustaqbalkiisa dambe ee shaqo?
2. Maadaama aadan warbixintaada noogu sheegin wax sharciyad ah ood u cuskatay xil ka qaadida marka soo lama dhihi karo wasiir habka aad u martay xil ka qaadida Dr. Ibraahim waa ku tagri fal awoodeed?

3. Dhinaca Kale qaabka aad na tiri xilka waan uga qaaday Dr. Ibraahim Soo saameyn xun kuma yeelan karto shirkadihii aan wadahadalka la wadnay oo soo isma dhihi karaan heshiis kasta ood la gashaan Dawladda soomaaaliya iyadoon procedure saxan loo marin beey ka bixi karaan iyadoon shirkad ahaan aan lagu wargalin marka dareenkaas soo ma  keeni karo in shidaalka Soomaaliya faraha lagala baxo marba hadaan xuquuqda qaanuun ee qofeed aan la dhooreenin cawaaqibtaas soo adiga qaadi meysid?
4. Dhinaca kale Website kii lagala socday Bid Round ka iyo emailadii guddiga in aad xiratay baa la sheegay, Maxaa dhacay ood u xiratay ma inkhilaab baa Dalka ka dhacay?

Jawaabta Wasiirka

1. Aniga ma dhihin awood qeybsiga darted baan ugu qaaday xilka ee waxaan xilka uga qaaday wada shaqeyn la'aan aniga iyo ibraahim na dhexmartay waana xadgudub maamul. Dr. Ibraahim Wuxuu diiday in uu dhameystiro dhismaha Hay'adda marka sidaas baan uga qaaday, sidaad I weydiisay aniga Digniin af ah waan siiyay oo Gudoomiye Muudeey baa marqaati ka ah. Arinta la xiriirta Damiirka bi'aadamnimo Waa muhiim waana run in Dr.Ibraahim 2004 tii uu shaqada ku soo biiray tixgelina waan ku siinjiray arintaa habka loo eryayna uma arko in sharaftiisa wax u dhimeyso waayo wasiiradaba sidaas oo kale baa xilka looga qaadaa anigaa la iiga qaadi karaa hada.

2. Dr. Ibraahim aniga baa shaqaale rasmi ah ka dhigay oo wasaaradda shaqaalaheeda buu ka mid yahay wuuna ka sii shaqeyn doonaa wasaaradda, Shirkii wadaxaajoodka shirkadaha shidaalka ee Hay'adda Turkiga HBS u aaday waxaan ku caawiyay shaqaale qubaro ah oo wasaaradda u shaqeeya maadaama ay Hay'adda quburo ku filan aysan heysanin.

3. Dhinaca saameynta ee arintaan yeelan karto waa mid jirta oo saameyn waa ku yeelan kartaa shirkadaha shidaalka laakiin mar kasta shirkadaha kama maarmaan shidaalka Soomaaliya oo iyagaa na soo raadsada.

4. Emailka Dr. Ibraahim kaliya baan xiray emailada xubnaha kale iyo website kaba midna lama xirin, Website ka sesmic datada baa lagu iibiyaa, su'aalaha Bidkana waa looga jawaabaa marna hawada kama bixin oo waxaaba noo maamusho shirkad la yiraahdo (TGS-Spectrum beey iibsatay).

S2aad: Xildhibaan:

1. Falanqeyn: Wasiirka xilkaan uga qaaday Dr. Ibraahim sixidda awood qeybsiga ku dhisan ee 4.5 ma dhihin ee wuxuu yiri shaqo gudasho la'aan iyo khilaaf baan uga qaaday xilka.

2. Qodobada ka mid ah sharciga Betroolka oo xusayo sida xilka looga qaadi karo xubnaha Hay'adda isagoo tiriyay qodobadaan a) Hadeey galaan Xadgudubyo maamul. b) Faafinta sirta Shidaalka. c) Laaluush qaadasho iyo in uu u kala hiiliyo shirkadaha

tartamaya. Wasiir su'aasheedu waxay tahay qodobadaan aan sheegay qodobkeed u cuskatay xil ka qaadista Dr. Ibraahim?

Jawaab Wasiirka:

Horta Dr. Ibraahim laashuush kuma tuhmayo laakiin shaqo gudasho la'aana waa jirtaa waxaa kaloo la dhihi karaa shirkadaha wuu u kala hiiliyay oo shirkad 48% in ay faa'iidada ka qaadato buu u ogolaaday, shirkad kalana 50% in ay faa'iidada ku yeelato.

S3aad: Xildhibaan

1. Falanqeyn: Wasiir sida wasiirada shaqada looga qaado iyo qofka shaqaalaha ah sida looga qaado waa kala duwanyihiin Jago wasiireed waa xil siyaasi ah arimo siyaasadeed bayna xilka ku waayi karaan, Xilka Dr. Ibraahim hayayna waa mid qof shaqaale technical ah habraac loo marana leh marka isku tusaale maloo soo qaadan karo.
2. Su'aal: Wasiir siduu shirkadaha ugu kala hiilay noo sheeg? Shirkadeebuu 50% faa'iidada uga ogolaaday?

Jawaab Wasiirka:

Waa Liberty mida uu 50% faa'iidada uga ogolaaday laakiin aniga xitaa waan ku raacsanahay in uu sidaa yeelo oo arimo qasbayay baa jiray?

S4aad: Xildhibaan

Oo Wasiir hadiiba aad ku raacsantahay maxaad ugu eedeenysaa in uu shirkadaha u kala hiilay sideese uga dari kartaa eedaha xil ka qaadistiisa u cuskatay?

Jawaab Wasiirka:

Kuma eedeynin, kuma eedeenayo waa ku raacsanaa sida uu go'aansaday.

S5aad: Xildhibaan

Dhinaca kale Wasiir madaxbaaninada hay'adda SPA ay ka madaxbanaanahay Wasaaraddaada ma rumeysantahay? Maxay tahay shaqooyinka ay gaarka u leedahay Hay'adda Betroolka bal inoo sheeg?

Jawaabta Wasiirka:

Haa waa rumeysanahay in ay naga madaxbanaantahay, shaqooyinka ay gaarka u leedahayna waa arimaha la xiriira regulations ka.

S6 aad: Xildhibaan

1. Wasiir sida ku qoran sharciga Betrolka Hay'adda Betrolka waxay gaar u leedahay wada xaajoodka shirkadaha daneenaya shidaalka Soomaaliya halka wasiirka adiga aad sixiixa gaar u leeyahay marka adigoo wasiir kii ah maxaa u doontay wada xaajoodkii Turkiga oo aad uga qeybgashay shirkaa?
2. Dhinaca kale waxaa naloo sheegay markii wadaxaajoodkii soo dhamaaday oo xamar lagu soo laabtay ee laguu keenay hardcopy ga heshiiskii lagu soo gaaray Turkiga si aad u saxiixdid in aad dalbatay sida Soft copy gii heshiiska la soo daabacay dood kadibna markii lagu siiyay aad wadaxaajood cusub aad adiga shaqsiyan la bilaawday shirkadihii heshiiska lala soo gaaray maxaad sidaa u sameysay, oo ku galiyay shaqo aadan laheen?

Jawaabta Wasiirka

Horta heshiiska wuu qaldanaa mid la sixiixi karo maaheen waxaana xaq u leeyahay in aan qodaba aan wax ka badali karo waxaana kuu sheegayaa in aan shirkadaha qodobo muhiim ku qabsaday, emailana u diray, xubnaha Hay'adana ay qireen in aan ka saxnaa waxaana la isku raacay soo jeedinteedii.

S7aad: Xildhibaan

Wasiir waxaan maqalnay in miisaaniyadii 2020 ay guddiga ku lahaayeen lacag $100,000 oo guno shaqo ah guddigana ay lacagtaas ka soo gaartay lacag dhan $72, 000 aaway lacagta dhiman ee $28,000 ma wasaaradda baa isticmaashay?

Jawaabta Wasiirka

- Hantidhawraha su'aashaas Weydii.

S8aad Xildhibaan

Wasiir miisaaniyada 2021 waxaa hay'adda ugu jirta $500,000 Baarlamaanka baa ansixiyay, Madaxweynaha baa sixiixay xeer maaliyadeed ku dhaqan kaa rabo waaye lacagtiina adigaa la soo wareegay sida naloo sheegay, maxaad uga hor imaaneysaa xeerka Maaliyadda Dalka?

Jawaabta Wasiirka,

Waa run wasaaradda ba la soo wareegtay sababtuna waa hay'adda in aysan laheen shaqaalihii u maamuli lahaa maaliyadda ilaa laga helayana wasaaradda baa maamuleysa waxaana noo soo ogolaaday in aan maamulno wasaaradda Maaliyadda.

S9aad: Xildhibaan

Wasiir wasaaradda waxaa ka erisay 6 shaqaale khubaro ah, aqoontooda sareeyo qaar baa BHD ahaa waxaa ugu dambeeyay oo erisay Dr. Ibraahim maxaad asset kii wasaaradda u burburineysaa? Wasiir Magacyada xubnaha aan ka hadlayo, xirfadahooda, heerkooda aqooneed waxay ku qoranyihiin warqadaan ee fiiri?

Jawaabta Wasiirka

Aniga horta shaqaalahaan ma eryin, Xoghayihii hore Jamaal waxaa xilka ka qaaday madaxweynaha JFS oo ku soo badaly Mudane Karar Doomeey aniga shaqo kuma lihi arintaa, Jamaaal hada waa shaqaale ka tirsan Wasaaradda, Dhina kale Mudane Karar isagaa xilkiisa ka istaqaalooday waana ka aqbalay, Mudane C/laahi Xeydar Jaamacada Umada baa naga soo codsatay waana ku wareejiyay warqaddii codsiga ay noo soo qoreen iyo middii aan ugu wareejiyayba waa kuwaan, Mudane Eng. C/qaadir Abiikar isagaa shaqada isaga tagay waana shaqaale weli ka tirsan wasaaradda cid ka cilineyso ma jirto haduu shaqo rabo waxaana halkaan ku hayaa twitt uu soo qoray oo ku leeyahay Dr.Ibraahim adigaa horay u eryay shaqaalihii laga eryay wasaaradda.

S10aad, Xildhibaan:

Wasiir dhinaca kale ka fiiri shaqaale aqoon iyo khibrad shaqo wada leh oo shirkado calami ah la soo shaqeeyay, Wasiiradii kaa horeeyay ay soo tacbeen baryana ku wada keeneen in ay xiligaagii shaqada kawada tageen oo kula shaqeyn kari waayaan sidee kuugu muuqataa?

Jawaabta Wasiirka

Qofka xaq buu u leeyahay in uu shaqada ka tago anigana xaq baa u leeyahay in aan shaqada ka saaro qofkii shaqeysan waayo oo sharcigaa ii ogol.

S11aad, Xildhibaan:

1. Wasiir maxaa fashiliyay heshiiskii aad la gali laheed shirkadaha shidaalka ee Costline iyo Libery?
2. Wax saameyn ah miyeey ku lahaayeen heshiis gaarid la'aantii dhacday hay'addaha IMF, World Bank iyo FGC hadeey ku lahaayeena maxaa ku kalifay in ay sidaa go'aansadaan?

Jawaabta Wasiirka

Heshiiska in aan galno inagaa iska diidnay sababo jiro awgeed, Hay'adaha ka shaqeeya maamul wanaaga lacagaha hadeey warqabeen waxay la xiriirayeen Wasaaradda maaliyadda ee iyaga weediiya.

S12aad, Xildhibaan:

1. Wasiir iyadoo Bid round kii socdo maxaa uga dhinac furteen Direct negotiation ka?
2. Dhinaca kale wasiir hadaan dib kuu xasuusiyo markaan sharciga ku dareenay qodobkaan direct negotiation ka waxaad nooga codsateen in aan ku darno sharciga baahi loogu qabi doono in wadaxaajood toos ah lagaliyo blockyada ciladaha leh ee shirkaduhu daneeneynin hadana waxaad direct negotiation ku gasheen block yadii fiicfiicnaay ee lawada raadinayay taas soo qiyaano maahin?
3. Dhinaca kale labada shirkadood ee aad direct negotiation ka aad la furteen waxaa nagu maqaale ah in aysan laheen awood ay shidaal ku soo saari Karaan ayna rabaan in ay sii iibayaan block yada la siiyo si ay faa'iido fiican uga helaan beecaas marka maadaama Dawladda u taagantahay ka shaqeysta danaha Soomaalida maxaad shirkado soomaali ah blockyadaan u siin weyseen si ay shirkadaheena uga faa'iidaan kheeraadka Dalka halka aad shirkado kale oo Ajaaniib ah uga faa'iidanaysaan?

Jawaabta Wasiirka

Horta Bid round ka socda iyo Direct negotiation ka lawado waxba iskuma dhibayaan oo waa blockyo kala duwan, Dhica kale direct negotiation in aan sameyn karo sharciga Betroolka baa noo fasaxayo, Block yada aan direct negotiation ka ku galeynana kuma xirna iin leh iyo iin la'aan. Hada labada shirkadood ee aan direct negotiation  la wadno waxay xaq lahaansho ku sheeganayaan blockyada aan wadahadalka kala furnay waxaana heshiis ku siiyay dawladihii naga horeeyay Somaoil and Gas (Costline) iyada waan wada ognahay.

S14aad, Xildhibaan:

Wasiir markaan Jabuuti joognay waxaad adiga iyo Dr. Ibraahim noo sheegteen in aan Somaoil and Gas (Costline) aysan heshiis block yo lagu siiyay aysan jirin. Wasiir kii hore ee Betrol ka Mudane C/risaaq wuxuu noo sheegay in aysan jirin heshiis block yo lagu siiyay Somaoil and Gas (Costline) sideed hada u leedahay horay baa loogula heshiiyay Block yada?

Jawaabt Wasiirka

In Somaoil and Gas (Costline) lagula heshiisay 12 bolock oo ay iyaga ka xulanayaan Blockyadeena heshiiska buu ku cadyahay wuu yaalaa heshiiska waadna arki kartaan.

S15aad, Xildhibaan:

1. Falanqeyn: Wasiir heshiis yada waa kala duwanyihiin, waa kala shaqo, waana kala magac, anagana waxaan aragnay heshiis lagula galay Somoil and Gas (Costline) in ay seismic data noo qaadaan ma aynaan arkin mid blocks lagu siiyay oo lagula heshiiyay.
2. Dhinaca kale Waxaan ku weediin lahaay Liberty yaa heshiis la galay xuquuqda ay sheeganeyso iyada halkeey nooga yeelatay?

Jawaabta Wasiirka

Liberty waxaa heshiiska u saxiixay RW hii hore Mudane Cumar C/rashiid waana heynaa heshiiskaas.

S16aad, Xildhibaan:

Wasiir waxaad warbixin naga siisaa shirkada Somoil and Gas, Shirkadaas magacii loo yaqaanay waa iska badashay oo waxay la baxday coastline, waxaan ku ogaan jiray oo wakil uga ahaan jiray Soomaaliya nin Soomaali ah oo la yaqaano hada waxaa wakil u ah nin kale oo Saaxiibkaa ah, oo guri kula dagan oo lagu magacaabo Shiikheey arintaas sidee ku dhacday bal warbxin naga sii?

Jawaabta Wasiirka

su'aalahaan waa below the belt, shirkada Someoil and Gas in magaceeda badalato iyadaa xaq u leh oo maxaa magaciinii u badasheen kuma qabsan karno, waxay noola yimaadeen document cadeenayo in ay magacii badasheen waana kula macaamilnaa magacooda cusub.

Ninka saaxiibkeey ah ee aniga ila dagan oon weliba aan isku qabiilka nahay shirkada Costline shaqaale uma ahan shaqana kuma lahan.

S18aad, Xildhibaan:

Wasiir su'aasha waxaan ka eegayaa dhinaca ethical and corruption aspects marka si kale ha u fahmin, Mudane Shiiqeey haduusan Costline u shaqeeynin ma wasaaradda buu u shaqeeyaa? mise advisor buu kuu yahay? maxuu yahay ninkaan aan agtaada laga waayin xiliyada shaqada?

Jawaabta Wasiirka

Waan ku celinayaa Mudane Shiikheey Costline uma shaqeeyo, Wasaaradeeda uma shaqeeyo aniga advisor iima ahan waa nin aan saaxiibo nahay.

S19aad, Xildhibaan:

Wasiir marka muxuu shirkii negotiation ka shirkadaha shidaalka ee ka socday Turkiga uga qeybgalay?

Jawaabta Wasiirka

Anigow ila socday.

S20aad, Xildhibaan:

Horta waxaan cadeenayaa geedisocodkii Shidaalka soomaaliya in uu maantay dhintay waayo arimaha shidaalka waa la dhooraa waa sida daroogada oo kale waxaa laga ilaalayaa khilaafka marba haduu khilaaf soo galo cid lacag iska galineyso ma jirto, wasiir marka hawshaas waad dishay adigeey Aabe ku leedahay.

Dhinaca kale madaxbaanadii hay'ada Meesha baad ka saartay, hadii aad Gudoomiyihii hay'adda aad xilkii ka qaadeyso soo hay'ada in aad is hoos keeyneysid maaha waxaa dooneysid oo gudoomiyihii amarkaaga ku shaqeyn waayaba kama qaadeysid.

Wasiir waxaan leeyahay Dr. Ibraahim xil ka qaadistiisa sharci ma'aha sida shirciga Betrolka qabo uma aadan marin, sida sharciga shaqaalaha rayidka qabana uma aadan marin, sharciga shaqaalaha rayidka wuxuu qabaa in qof ka marka hore la waaniyo, kadibna diginin af ah la siiyo kadibna mid qoraal ah la siiyo intaasba maadan soo sameynin. Waxaad tiri Gudoomiye Muudeey baa marqaati iiga ah in aan diginin af ah siiyay oo maxaa Gudoomiye Muudeey ka galay arintaan ma guddigeena buu xubin ka yahay, ma wasaaraduu ka shaqeeyaa arintaas wasiir ma cadda, maxaad anagoo guddigii ah noola socodsiin weysay haduu khilaaf jiray, hadaan ogaan laheen arinta Meesha ay mareyso waxa maantay dhacay iyo wax u dhawba ma dhaceen Dr. Ibraahim inagaa ka keeni laheen in uu xilkiisa ka istaqaaloodo iyadoon dhicin ceebta maantay taagan, ka gudub.

Wasiir sided u damacday in aad heshiis gashid iyadoon xeerarka muhiimka u ah heshiisyada aan weli la dhameystirin sida Tax Regime iyo inviromental law ga shariciga Bertoolka ku xusan in ay wasaarada soo diyaarineyso midna kama aadan bilaabin. Sharcigii Environment ga oo la'aantiis aan hawlo shidaas qodis la aadi Karin baan diyaarsaneen, xeerkii ruqsadaha, sharcigii macdanta isna lama hayo waad ogtahay meeshii la damco in shidaal laga qodo macdan baa loogu tagi karaa maxaa ku maamulysaa hadeey sidaa dhacdo oo goobtii macdan laga helo? Tax regime kii ma diyaarsana maxaad ugu ordeysaa heshiis galidda?

Jawaabta Wasiirka

J20: Xildhibaan/Wasiir Daa'uud Waa runtaa laakiin sharciga environment ga golaha wasiirada waa ka soo gudbay hadana intii laga soo dhameystirayo qeyb aan ku sii shaqeysano wuxuu noogu qoranyahay PSA ga waxaa kaloo noo qoran hadii goob shidaal laga qodayay macdan laga helo sidii looga dhaqmi lahaa marka waan dadaaleynaa wasiir.

S21aad, Xildhibaan:

Wasiir hadii aad ninkaad doontayba eryeysida maxaa hay'adda looga baahanyahay?

Jawaabta Wasiirka

Maka jawaabin Wasiirka

S22aad, Xildhibaan:

Hal su'aal oo iigu damebysa maku weeydiin karaa wasiir?

Jawaabta Wasiirka

Diyaar baan kuu ahay ee I weedii.

S23aad, Xildhibaan:

Wasiir mudo xileedkaagii waxaa kaaga dhiman 11 berri marka mudaas yar ee kuu dhiman malaga yaabaa in aad shati shidaal qodis aad ku bixisid?

Jawaabta Wasiirka

Sharciga baa ii ogol in aan heshiis sixiixo inta lagu gudo jiro mudo xileedkayga.

S24aad, Xildhibaan:

Aan sii dabadhigee adiga shaqsiyan ma damacsantahay in aad heshiis shidaal qodis gashid mudada yar ee kuu dhiman?

Jawaabta Wasiirka

Su'aashaada ah adiga ma damacsantahay maya ma damacsani in aan heshiis shidaal galo xiligaan.

S25aad, Xildhibaan:

Wasiir golaha wasiirada iyagoon ogeen baad hoos galiseen xubnaha Golaha Wasiirada adiga iyo Ra'iisul wasaaraha xil ka qaadista gudoomiyaha hay'adaha Shidaalka, wasiirada qaar markaan warsanay waxay noo sheegeen wixii dhacay in aysan fahamsaneen oo la is jujuubay----Buuq baa hareeyay shirkii su'aalo weediinta iyo dhageysiga wasiirka iyadoon su'aashaan laga jawaabin baana la kala istaagay.

Lifaaqa 2aad:

[redacted]

mhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
*fiska Madaxweynaha*

ـهورية الصـومـال الفيدرالية
الرئيس

**Federal Republic of Somalia**
*Office of the President*

**XEER MADAXWEYNE. LR.328** **TAARIIKH: 22/11/2020**

**MAGACAABIS XUBNAHA MAAMULKA HEY'ADDA BATROOLKA SOOMAALIYEED**

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

**Markuu Arkay:** Qodobada 87aad, iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah

**Markuu Arkay:** SHARCI LR. 19, taariikh: 08/02/2020 kuna saabsan SHARCIGA BATROOLKA JF SOOMAALIYA

**Markuu Arkay:** Xeer Ra'iisu-wassaare Lr. 105 iyo go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada: SHGW.0099.07.20 ee 30/07/2020 kuna saabsan magacaabista Xubnaha Maamulka Hey'adda Batroolka Soomaaliyeed

**Markuu Tixgeliyay:** Baahida loo qabo in la magacaabo Xubnaha Maamulka Hey'adda Batroolka Soomaaliyeed

**Wuxuu Xeeriyay:**

**Qodobka 1aad**

**Laga billaabo marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo xeerkan, waxaa la magacaabay Guddoomiyaha, kuxigeenkiisa** iyo Xubnaha Maamulka Hey'adda Batroolka Soomaaliyeed:

1. Mudane Ibraahin Cali Xuseen — Guddoomiyaha Hey'adda B. Soomaaliyeed
2. Marwo Caasha Cusmaan Axmed — Guddoomiye-ku-xigeenka Hey'adda B.S.
3. Mudane Ibraahin Axmed Layte — Xubin
4. Mudane Cabdulqaadir Aadan Maxamuud — Xubin
5. Mudane Ibraahin Cabdulqaadir Maxamed — Xubin
6. Mudane Axmed Xaaji Cabdi — Xubin
7. Mudane Cabdixafiid Cali Dirir — Xubin
8. Mudane Mahad Maxamed Sh. Xasan — Xubin

**Qodobka 2aad.**

Waxa uu dhaqangelayaa Xeerkan marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Soomaaliyeed

**MUQDISHO: 22/11/2020**

Madaxweynaha J.F.S
**Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)**

Office of the President, Villa Somalia, Mogadishu · Tel: +2525 - 941000(Office), Fax: +2525 - 941001


Lifaaqa 3aad


## XEERKA QUUNDAHA MIISAANIYADDA 2021-KA

| | | Madax | Hay'adaha | 2019 Dhabta | 2020 Kunoqoshada | 2020 Kutalagalka |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 200 | | | **Hay'adaha Difaaca & Amniga** | **107,287,415** | **149,943,644** | **163,859,558** |
| | 201 | | **Difaaca** | **58,971,490** | **87,013,853** | **95,744,097** |
| | | 20101 | Wasaaradda Gaashaandhiga | 1,145,772 | 1,238,363 | 1,262,363 |
| | | 20102 | Taliska Ciidanka Xooga Dalka | 56,284,475 | 84,198,490 | 92,904,734 |
| | | 20103 | Maxkamadda Ciidamadda | 1,444,588 | 1,462,000 | 1,462,000 |
| | | 20104 | Hay'adda Naafada iyo Agoonta C. Qalabka Sida | 96,656 | 115,000 | 115,000 |
| | 202 | | **Amniga Gudaha** | **48,315,925** | **62,929,791** | **68,115,461** |
| | | 20201 | Wasaaradda Amniga Qaranka | 1,876,005 | 1,832,672 | 1,895,202 |
| | | 20202 | Taliska Ciidanka Booliska | 29,089,794 | 41,995,800 | 44,118,940 |
| | | 20203 | Hay'adda Nabadsugidda Qaranka | 12,754,562 | 14,505,679 | 17,505,679 |
| | | 20204 | Hay'adda Socdaalka & Jinsiyadaha | 4,595,564 | 4,595,640 | 4,595,640 |
| 300 | | | **Hay'adaha Dhaqaalaha** | **26,007,365** | **47,655,543** | **62,413,512** |
| | 301 | | **Tamarta & Biyaha** | **1,290,061** | **3,373,552** | **8,049,477** |
| | | 30101 | Wasaaradda Tamarta & Biyaha | 1,111,940 | 1,193,752 | 5,240,192 |
| | | | Mashruuca SEAP | 178,122 | 2,179,800 | 2,809,285 |
| | 302 | | **Macdanta** | **1,186,443** | **1,681,595** | **1,695,772** |
| | | 30201 | Wasaaradda Macdanta | 922,866 | 1,402,012 | 1,063,772 |
| | | 30202 | Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed | - | - | 500,000 |
| | | | Mashruuca SOPTAP | 263,577 | 279,583 | 132,000 |
| | 303 | | **Beeraha** | **1,132,698** | **4,002,516** | **1,739,756** |

Lifaaqa 4aad

Villa Hargeisa, Mogadishu
E-mail: nresources.committee@parliament.gov.so
Website: www.parliament.gov.so


Freedom
32%
5:35
FRIDAY, JANUARY 29
Google Play services • 6h
Account action required
a.mohamed@hbs.gov.so
Swipe to unlock


32%
5:36 PM
Google
Verify it’s you
You were signed out of your Google Account. Sign in again to continue.
Next

Lifaaqa 5aad

## Madaxda iyo khubarada wasaaradda ee uu ceyriyay wasiir Abdirashiid

Mudne waxaa xusid mudan in wax la iska weydiiyo mudadii uu xilka hayay wasiir Abdirashid khilaafkii iyo gabood faladii uu kula kacay madaxdii wasaaradda iyo khubaradii oo sababtay in shaqada isaga tagaan laga ceyriyo ama isaga tagaan:

1. Jamaal Qaasim Mursal – Xoghayihii Joogtada, Wasaaradda Batroolka
   Wuxuu ahaa khabiir ku takhasusay maamulka iyo maareynta kana qeyb qaatay dibu-habeynta iyo horumarinta wasaaradda. June 2019
2. Karar Shukri Doomey – Agaasimaha Guud , Wasaaradda Batroolka
   Agaasimaha wuxuu ahaa khabiir ku bartay petroleum engineering muddo la soo shaqeeyay shirkadaha batroolka ee caalamiga ah. Mudda uu joogay hawl badan oo la taaban karo oo ay ka mid tahay soo bandhigidii xogta batroolka ee London lagu qabtay. Shaqo ka fariisi iyo cadaadis joogta ah oo lagu hayay darteed shaqadii qasab noqotay in uu ka tago 25 January 2020.
3. Dr. Abdulahi Haydar – Madaxa nidaaminta (Director of Regulation Department)
   Wuxuu ahaa senior geologist (PhD) muddo ka badan 7 sano u shaqeynayay wasaaradda batroolka. Culays iyo caburin maamul iyo faragelin shaqadiisa ah darteed uu ku qasbanaaday in uu shaqada isaga tago uu isaga wareego Jaamacadda Ummadda.
4. Eng. Abdiqadir Abiikar – Madaxii Farasmada (Director of the technical department)
   Wuxuu ahaa senior geologist aqoon sare leh oo muddo 7 sano ka badan u shaqeynayay wasaaradda. Kadib markii shaqadiisa laga cuuryaamiyay, gooni laga dhigay waxa uu ku qasbanaaday in uusan soo shaqo tegin 3 sano ee ugu dambeysay
5. Abuukate Tahliil – Waaxda Sharciyada ee waaradda batroolka
   Cid shaqo u dirsato ma laheyn inta uu wasiir Abdirashiid joogay. Dibadda ayuu ka joogaa wasaaradda.
6. Iyo kuwo kale